

Haddii aad tahay qof ey carruur u dhigtaan dugsiyada xanaanada ee Norrköping

2020-05-07

Warbixin ku socota waalidka/ qofka leh masuuliyadda sharciyeed ee ilmaha

Salaan,

Cudurka Korona iyo waxyeelladiisa waxey si xooggan saameyn ku reebeen shaqada dugsiyeenna xanaanada muddo laba bil hadda ah. Culeyska dhinaca shaqada iyo kan saaran shaqaalaha wuxuu ahaa mid sare waxaana u shaqeyneynay qaab si fudud loo bedbedeli karo annagoo waqti yar gudihiis xaaladeyna waafajineyna talooyinka iyo habraaca Hey'adaha. Laakiin waxaan ku faani karnaa in dugsiyada xanaanada ee Norrköping ey muddadaan gudaheeda xattaa ku guuleysteen iney xoogga saareen waxbarasho tayadeeda sarreyso. Taasna waxaa horseed u ahaa taageerada aan idinka helnay haddii aad tihiin waalidiinta.

Isbedelka ku saabsan sida aan uga falcelinno marka aan isku aragno calaamado xanuun oo yaryar, in aad carruurtiinna guriga ku heysaan ama aad soo dooneysaan marka aan idin soo wacno iyadoo mararka qaar ey adagtahay in shaqada laga soo tago, in aad fahantsantihiin in carruurtiinna mararka qaar ey wax u dhigaan macallimiin shaqeeya bedelka macallimiintooda caadiga ah iyo in aad dhiirri gelineysaan shaqaalaha xanaanada in shaqadooda tahay mid aad muhiim u ah.

Hadda waxaa yimid kuleelka xilliga guga weyna fududahay in loo maleeyo in wixii jiray na dhaafeen, laakiin waan la soconnaa in halkan ey wali xaaladdu tahay mid khatar ah isla markaana in Hey'adda caafimaadka dadka eysan wali khafiifin talooyinka ey dhiibtay. Waxaan rajeyneynaa in aad sii wadaan fahanka aad fahantsantihiin xaaladdeyna isla markaana aan si wanaagsan u wada shaqeyno iyo in aan gacan ka geysanno yarenta faafidda cudurka iyo in aan muujinno tixgelin dheeraad ah.

Mahadsanid!

Salaan diirran

Adam Olofsson, madaxa dugsiyada xanaanada
Caroline Strid, madaxa dugsiyada xanaanada
Sofie Lindén, Maamulaha waxbarashada